

# Gadashada daawooyinka ee Finland

1.2.2022

## Warbixintan kooban waxaa loogu talaggalay qaxootiga iyo dadka magangelyo-doonka ah ee aan haysan lambarka aqoonsiga qofka.

### Halkee ayaad daawo ka gadan kartaa?

Finland waxaa daawooyinka laga helaa farmashiyaha oo kaliya. Daawooyinku waa daawooyinka dhakhtarku qoro iyo daawooyinka uu qofku iskiis isugu daweeyo.

Daawooyinka qoran waa daawooyinka uu dhakhtarku qofka u qoro.

Daawooyinka uu dhakhtarku qoray waxaad ka heleysaa oo kaliya farmashiyaha, marka aad tusto warqadda tilmaamaha bukaanka ee uu dhakhtarku ku siiyay.

Mararka qaar uma baahnid in aad lacag ka bixiso daawada uu dhakhtarku kuu qoray, waxaa laga yaabaa in ay tusaale ahaan dowladdu bixiso. Tusaale ahaan haddii aad deggantahay xerada qaabilaadda qaxootiga, waxaad haddii loo baahdo heli kartaa warqadda ballanqaadka ee lagaaga bixinayo daawada lagu qoray.

Marka aad gadanayso daawada uu qofku iskiis isugu daweeyo, uma baahnid warqadda daawada lagu qoro.

Daawooyinka qofku isku daweeyo waxaa laga iibsanaa karaa farmashiyaha oo kaliya.

Daawooyinkaas laguma gado dukaamada caadiga ah.

Daawooyinka uu qofku iskiis isugu daweeyo waa tusaale ahaan daawooyinka xanuunka qaarkood iyo boomaatooyinka daawada ah.

Waxaa kale oo farmashiyaha laga helaa agabka daryeelka, tusaale ahaan agabka wax lagu duubo iyo qalabka xummadda lagu cabiro.

Waa in aad adigu iska bixisaa lacagta daawooyinka uu qofku iskiis isugu daweeyo iyo agabka daaweynta.

### U adeegista qof kale

Qof kale farmashiyaha wuu kaaga soo qaadi karaa daawada lagu qoray.

U adeegista qof kale waxay suurageleysaa marka uu qof kale wado tilmaamahaada bukaanka ee warqadda ah.

Haddii aad qof kale u adeegayso, waa in aad caddaysaa aqoonsigaada.

### Farmashiyaha waxaad ka heleysaa talooyin la xiriira isticmaalka daawooyinka

Farmashiyaha ayaa dadka lagu siiyaa talooyin la xiriira sida loo isticmaalo daawooyinka iyo agabka daryeelka.

Tilmaamaha isticmaalka daawooyinka uu qofku iskiis isugu daweeyo waxay ku qoran yihiin baakadda daawada.

Daawada dhakhtarku qoray waxaa sharooto lagula dhejiyay tilmaamaha isticmaalka daawada ee uu dhakhtarku bixiyay.

### Maxaa loola jeedaa beddelista daawada?

Farmashiyaha ayaa laguugu sheegayaa, haddii ay jirto daawo qolo kale samaysay oo lamid ah daawada lagu qoray, taas oo qiimo ahaan ka jaban tan lagu qoray.

Daawadan waxaad ka heleysaa farmashiyaha, haddii aanu dhakhtarku mamnuucin in la beddelo daawada.

Daawada ay qolo kale samaysay ee lamidka ah daawadaada lagu qoray waxaa ku jira maadada daawada lagu qoray ku jirta mid le'eg. Beddelista daawadu waa ammaan.

**Daryeelka daawadu wuxuu sida ugu fiican u hirgalaa, marka aad ogtahay arrimaha la xiriira daryeelkaada daawada. Si geesinimo leh u weydii arrimahan dhakhtarka iyo farmashiyaha.**



LUOTETTAVAN  
LÄÄKETIEDON  
PUOLESTA  
Lääkeinformaatioverkosto